# TILMAAMAHA MAGACAABIDA KORIYAHA – ILMO YAR

**Tilmaamahan caadiga ah waxaa loogu talo geley ujeedo macluumaad sheeg oo kaliya oo maaha talo sharci oo ku saabsan kiiskaaga. Hadii aad doorato in aan naftaada matasho, waxa ku qabanaya shuruuc iyo nidaamyo lamid ah kuwa looyarka.**

## MACLUUMAAD GUUD

- Ilmaha Yar waa inuu degan yahay, ama uu joogaa wakhtiga ay bilaabmayso dacwaddu degmada aad ka xaraynayso dacwadda.
- Ilmaha Yar ama qofka doonaya badqabka Ilmaha Yar waxa uu xarayn karaa kiiska.
- Ka eegitaanka duwaanka taariikhda danbiga ee magaca ah Xafiiska Colorado ee Baadhitaanka (CBI) iyo warbixinta daynta wakhtigan ee koriyaha lagu taliyay waa in lagu xareeyaa Maxkamada.
- Hadii Ilmaha Yar uu leeyahay dakhli, sida Kabka Dakhliga (Supplemental Security Income, SSI) ama dakhli kale oo badan, ama hanti uu leeyahay, sida hanti maguurto ah ama saamiyo, waxay noqonayaa in la xareeyo dalabka ilaaliyaha si loogu maamulo lacagta ama hantida.
- Maxkamadu waxay u magacaabi kartaa Koriye Ilmaha Yar, hadii Maxkamad ay usoo baxdo in magacaabida ay dan ugu jirto Ilmaha Yar oo afartan jumladood mid ahaan ay khusayso:
  1. Ogolaanshaha waalidka ee magacaabida.
  2. Xuquuqda waalidka ee barbaarinta waxaa meesha lagaga saaray amarka maxkamada.
  3. Waalidku diyaar uma aha ama ma awoodaan inay fuliyaan xuquuqdooda waalidnimo. Tusaale ahaan, waalidka ayaa dhintay ama waxay iskaga tageen ilmaha.
  4. Masuuliyada koriyaha ilmaha waxaa hore loo siiyay cid kale oo cidda kale ayaa markii danbe dhimatay ama awoodeedii ayaa meesha ka baxday oo koriyuhu cid kale ugumuu magacaabin koriyenimada dardaarankiisa ama macluumaad qoraal ah.
- Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan akhri §15-14-201 ilaa §15-14-210, C.R.S.
- Hadii aad qabto laxaad la'aanta una baahantahay qaabilaad macquul ah si aad u isticmaasho maxkamada, fadlan la xidhiidh Isku Duwahaaga ADA ee deegaanka. Macluumaadka xidhiidhka waxaa laga heli karaa websaytka soo socda: **http://www.courts.state.co.us/Administration/HR/ADA/Coordinator_List.cfm**

## WEEDHAHA CAAMKA AH

| | |
|---|---|
| ⌦ Codsi-gudbiye: | Qofka xaraynaya Dacwadda Magacaabista Koriyaha. |
| ⌦ Koriyaha: | Qof ah ugu yaraan 21 sano jir, degan ama aan deganayn, ee u qalma koriye Ilmaha Yar taas oo ku salaysan magacaabista Maxkamada. |
| ⌦ Qof Ay Khusayso: | Dad uu sheegey Sharciga Colorado oo ay waajib tahay in la siiyo wargelin dacwadda maxkamada. **Eeg Talaabada 3 wixii liiska dhamaystiran ah.** |
| ⌦ Waraaqo: | Wargelinta rasmiga ah ee aqoonsiga awooda Koriyaha. |
| ⌦ Ilmo Yar: | Qof aan xor ahayn oo ka yar 18 jir. |
| ⌦ Musharaxa Koriyaha: | Qof lagu sheegey dacwadda inuu noqdo Koriyaha. |
| ⌦ Ilmaha laga hadlayo: | Ilmaha Yar ee Koriyaha loo magacaabayo. |
| ⌦ Amar: | Waraaqaha rasmiga ah ee lagu sheegey awooda Koriyaha iyo masuuliyadihiisa/heeda mudada uu yahay Koriyaha. |

**Hadii aanad fahmin macluumaadkan, fadlan la xidhiidh looyarkaaga.**

## KHARASHKA

Kharash xarayn oo ah $199.00 ayaa la iska doonayaa. Hadii aad leedahay xaalad qoys oo u baahan u xaraynta koriye wax ka badan hal ilme, kaliya hal kharash xarayn ayaa la iska doonayaa, hadii Dacwadaha la wada xaraynayo isku maalin. Hadii aanad awoodin in aad bixiso, waa inaad buuxisaa Dhaarta Xaraynta Dacwadda Bilaa Lacag iyo Taageerada Dhaqaale (JDF 205) oo aad u gudbisaa Maxkamada. Marka aad gudbiso foomka JDF 205 ee aad buuxisay iyo Amarka banaan (JDF 206), Maxkamada ayaa go'aamin doonta hadii loo baahan yahay inaad bixiso kharashka xeraynta iyo in kale.

Kharashaadka kale ee dhinaca ku jira kiiska ay tahay inay bixiyaan waxaa weeye sida soo socota:

- ❑ Cadaynta Amarada iyo Waraaqaha $20.00
- ❑ Kharashka Adeega Kaladuwan
- ❑ Koobiyaynta Waraaqaha $ .75 boggiiba
- ❑ Maxkamada ayaa u magacaabi karta Koriyaha la igmaday (GAL) si uu u baadho oo uu warbixinta u gaadhsiiyo maxkamada, si loo eego hadii Koriyenimada ay dan ugu jirto Ilmaha Yar.

## FOOMAMKA

Si aad u hesho foomka onleynka ah booqo www.courts.state.co.usoo kadibna guji taabka **"Forms"** (foomamka). Bushqada/foomamka waxaa lagu heleyaa PDF ama WORD iyada oo la dooranayo **Probate - Protective Proceedings - New Case - Guardianship - Minor. (Dardaaran - Dacwadaha Ilaalinta - Kiis Cusub - Koriye - Ilmo Yar).** Waxa aad buuxin kartaa foomka onleyn ahaan oo waad daabici kartaa ama inta aad daabacdo ayaad ku qori kartaa ama ku daabici kartaa khad sax ah oo madaw.

**U akhri tilmaamahan si taxadir leh si aad u ogaato foomamka aad u baahan tahay, maadaama oo ay dhici karto in aad dhamaan u baahan tahay ama qaar kamid ah foomamka ku qoran. Waydii Maxkamada meesha aad doonayso inaad ka xarayso kiiskaaga si aad u eegto hadii ay leeyihiin dalab gaar ah.**

- ❑ JDF 705 Xaashida Macluumaadka Kiiska Dardaaranka
- ❑ JDF 714 Dhaarta Ku Saabsan Ku Dadaalid iyo Cadaynta Baahinta
- ❑ JDF 716 Wargelinta Dhagaysiga in la Baahiyo
- ❑ JDF 719 Ka Tanaasulka Wargelinta
- ❑ JDF 721 Awood Qareen oo Aan Laga Noqon Karin
- ❑ JDF 800 Qiraalka Masuuliyadaha
- ❑ JDF 805 Aqbalaada Shaqada
- ❑ JDF 806 Wargelinta Dhagaysiga ee Dadka Danaynaya
- ❑ JDF 812 Wargelinta Balanta Koriyaha iyo/ama Ilaaliyaha
- ❑ JDF 824 Dacwadda Magacaabista Koriyaha - Ilmo Yar
- ❑ JDF 825 Ogolaanshaha Waalidka
- ❑ JDF 826 Ogolaanshaha ama Xulashada Ilmo Yar
- ❑ JDF 830 Warqadaha Koriyaha - Ilmo Yar

**Waxaa sidoo kale lagaaga baahan karaa inaad xarayso mid kamid ah amarada soo socda taas oo ku xidhan nooca koriyaha ee aad dalbanayso.**

- ❑ JDF 827 Amarka Magacaabista Koriyaha - Ilmo Yar
- ❑ JDF 828 Amarka Magacaabista Koriyaha Kumeel Gaadhka ah - Ilmo Yar
- ❑ JDF 829 Amarka Magacaabista Koriyaha Xaalada Degdega ah - Ilmo Yar

## TALAABOOYINKA XARAYNTA KIISKAAGA

### Talaabada 1: Foomamka Buuxi.

Doorashada tilmaamahan waxay muujinayaan in aad qorshaynayso xaraynta Koriyaha Ilmaha Yar. Hadii aad leedahay xaalad qoys oo u baahan inaad u xarayso koriye wax ka badan hal ilme waxa lagaaga baahan karaa inaad diyaariso foomamka ku haboon ee ilmo kasta. Ilmo kasta waxa uu yeelan doonaa kiis u gaar ah si sirta loo ilaaliyo. $199.00 oo ah kharashka xaraynta Codsi-gudbiyihii doonaya koriyaha oo maaha kiiskii. Dacwadaha waa in isku maalin la xareeyaa. Qoraalka hoose waa in lagu buuxiyaa dhamaan foomamka la xareynayo. **Xaqiiji in aad la hadho nuqul dhamaan foomamka aad u xaraynayso Maxkamada si aad u haysato.**

| | |
|---|---|
| Maxkamada Deegaanka Maxkamada Dardaaranka Denver<br>____________________Degmada,<br>Cinwaanka Maxkamada Colorado: | |
| **Danaha:**<br><br>**Ilmo Yar** | **▲ KALIYA MAXKAMADA AYAA ISTICMAALAYSA ▲** |

| Looyarka ama Dhinaca Bilaa Looyarka ah (Magaca iyo Cinwaanka):<br><br>Lambarka Taleefanka: Iimeelka:<br>Lambarka FAAKISKA: Looyar. Lambarka Duwaanka: | Lambarka Dacwada: |
|---|---|
| | Waaxda: Qolka Maxkamada: |
| **MAGACA FOOMKA** | |

- ❑ **Dacwadda Magacaabista Koriyaha ee Ilmo Yar (JDF 824).**
  - ❑ Codsi-gudbiyaha waa inuu buuxiyaa **dhamaan** qaybaha khuseeya ee foomka.
  - ❑ Hadii aabaha ilmaha aan la garanaynin (wax magac ah aanu ku qornayn shahaadada dhalashada), markaa nuqulka shahaadada dhalashada ee ilmaha waa in lagu lifaaqaa Dacwadda. Hadii xuquuqda waalidka meesha laga saaray ama waalidku dhinteen, nuqulada waraaqaha meesha lagaga saaray ama shahaadada dhimashada waa in lagu lifaaqaa Dacwadda.
  - ❑ Codsi-gudbiyaha waa inuu saxeexaa foomkan.

- ❑ **Aqbalaada Shaqada (JDF 805).**
  - ❑ Buuxi dhamaan qaybaha khuseeya ee foomka oo waxa aad ku lifaaqdaa eegitaanka taariikhda danbiga ee magaca iyo warbixinta daynta wakhtigan ee koriyaha la doonayo.
    - ❑ Waxa aad ku lifaaqdaa nuqulka liisanka dirawalka koriyaha, baasboorka, ama aqoonsi kale oo hay'ad dawladeed bixisay.
    - ❑ Waxa aad ka qaadaa oo aad lifaaqdaa eegitaanka taariikhda danbiga magaca ee koriyaha la doonayo Xafiiska Colorado ee Baadhitaanka (CBI). Si aad u hesho eegitaanka taariikhda danbiga ee magaca, kala xidhiidh CBI 690 Kipling Street Denver, CO 80215, (303) 239-4300, ama cinwaanka [www.cbi.state.co.us](http://www.cbi.state.co.us)oo guji CBI Records Check.
    - ❑ Hel warbixinta wakhtigan ee daynta ee koriyaha la doonayo. Hoos waxaa ku yaala dhawr hay'adood oo ka warbixinta daynta ah:
      - ◆ Equifax, Inc., P.O. Box 740241, Atlanta, GA 30374, 1-800-685-1111, ama [www.equifax.com](http://www.equifax.com)
      - ◆ Experian, P.O. Box 2002, Allen, TX 75013, 1-888-397-3742, ama [www.experian.com](http://www.experian.com)
      - ◆ TransUnion, P.O. Box 2000, Chester, PA 19022, 1-800-916-8800, ama [www.transunion.com](http://www.transunion.com)
    - ❑ Ka reeb (masax) dhamaan aqoonsiyada lambarada sooshaal sikuuritiga warbixinta daynta iyo dhamaan marka laga tago afarta god ee xisaabta ugu danbeeya.
    - ❑ Kharashaadka dhamaan eegitaanka taariikhda danbiga iyo warbixinta daynta waa inuu bixiyaa koriyaha la doonayaa.
  - ❑ Koriyaha la doonayaa waa inuu saxeexaa Aqbalaada Shaqada.

- ❑ **Ka Tanaasulka Wargelinta (JDF 719).**
  - ❑ Foomkan waxaa buuxin kara oo saxeexaya qofka doonaya (marka laga tago Ilmaha Yar), ee raba inuu ka tanaasulo wargelinta wixii dhagaysiyo ama arrimo kale ah ee Maxkamada horteeda ah.
  - ❑ Foomkan ma buuxin karo Ilmo Yari. Eeg shuruudaha Wargelinta **Talaabada 4.**

- ❑ **Awood Qareen oo Aan Laga Noqon Karin (JDF 721).**
  - ❑ Foomkan waxaa uu waajib yahay **kaliya** hadii koriyaha la doonayaa uu ku nool yahay meel ka baxsan gobolka.
  - ❑ Koriyaha ka baxsan gobolka ee la doonayaa waa inuu buuxiyaa foomkan oo ku hor saxeexaa Karaaniga Maxkamada ama Nootaayada Dadwaynaha.

- ❑ **Ogolaanshaha ama Xulashada Ilmo Yar (JDF 826)**
  - ❑ Ilmaha Yar ee koriyaha loo doonayo, hadii uu yahay 12 jir ama uu ka wayn yahay, waxa uu xaq u leeyahay inuu ogolaado ama uu diido in koriye loo sameeyo. JDF 826 ayuu buuxin karaa oo uu saxeexi karaa Ilmaha Yar oo uu ku muujinayo ogolaanshihiisa/heeda ama diidmadiisa/deeda u samaynta. Maxkamadu waxay ku xisaabtami doontaa
rabitaanka Ilmaha Yar, laakiin diidmadiisa inuu ogolaado ma damaanad qaadayso in Maxkamadu ayna ku qorin koriyaha la doonayay.

**Fiiro gaar ah:** Tani ma bedelayso adeega shakhsi ahaaneed. Talaabada 4 - Wargelinta Dhagaysiga Ilmaha Yar wali waa in la buuxiyo.

- ❑ **Ogolaanshaha Waalidka (JDF 825).**
  - ❑ Waalidka Ilmaha Yar **waxay ogolaan karaan** koriyaha lagu qorayo iyaga oo buuxinaya JDF 825.
- ❑ **Warqadaha Koriyenimada - Ilmo Yar (JDF 830).**
  - ❑ Buuxi kaliya qoraalka foomka.
  - ❑ Maxkamadu waxay buuxin doontaa inta hadhsan ee foomka oo waxay saxeexi doontaa kadib marka la magacaabo Koriyaha.
- ❑ **Amarka La Doonayo (JDF 827, JDF 828 ama JDF 829).**
  - ❑ Dooro Amarka munaasabka ah ee ku salaysan nooca koriyenimada ee aad dalbanayso. Amarka lagu taliyay waa inuu waafaqsan yahay lambar 1 ee Dacwadda – JDF 824.
  - ❑ Buuxi qoraalka iyo wixii qaybo ah ee ku qoran bogga kow oo khuseeya kiiskaaga.

## Talaabada 2: Waxa aad Diyaar U Tahay Inaad Buuxiso Waraaqaha Maxkamada.

Waxa aad siisaa Maxkamada waraaqaha buuxsan sida ku cad Talaabada 1 ee sare oo waxa aad bixisaa kharashka xeraynta. Waxa aad heli kartaa taariikhda dhagaysiga karaaniga wakhtiga aad xeraynayso waraaqaha ama waxa aad la xidhiidhi kartaa karaaniga wakhti danbe si aad u hesho taariikhda dhagaysiga. Taariikhda iyo saacada dhagaysigan waa muhiim, maadaama oo aad u baahanayso inaad buuxiso Wargelinta Dhagaysiga ama inaad baahiso foomamka lagu sharaxay **Talaabada 3 iyo Talaabada 4.**

## Talaabada 3: Wargelinta Dadka Danaynaya. (Boosta ama Baahin Jaraa'id)

Kadib marka Dacwadda U Samaynta Koriye Ilmaha Yar la xareeyo oo dhagaysiga la mudeeyo, adiga (Codsi-gudbiye) waa inaad siisaa wargelinta wakhtiga iyo goobta dhagaysiga oo uu la socdo nuqulka Dacwadda dadka soo socda:

1. Ilmaha Yar, hadii uu yahay 12 ama uu ka wayn yahay
2. Qofka la sheegey inuu leeyahay masuuliyada daryeelka iyo gacan ku haynta kowaad ee ilmaha yar mudo ah 60 maalmood kahor xeraynta Dacwadda
3. Waalid kasta oo nool oo ilmaha dhalay ama, hadii aanu jirin, qofka wayn ee ugu dhaw qaraabo ahaan ee la heli karo
4. Qofka loo soo xushay koriyaha ilmaha yar hadii ilmaha uu yahay ugu yaraan 12 jir
5. Cid kasta oo loo soo xulay ee waalid ama koriye ah ee magacaaabistiisa aan lagaga horjoosan ama meesha lagaga saarin sida uu dhigayo
   §15-14-203(1), C.R.S. ama magacaabistiisa lagu ogolaaday §15-14-203(2)
6. Wixii koriye ama ilaaliye ah ee wakhti xaadirkan ilmaha yar ugu jira kaalintan gobolkan ama meel kale

### ❑ Ku Gaadhsiinta Boosta.

- ❑ **Hadii aad garanayso cinwaanka qofka aad siinayso wargelinta,** buuxi Wargelinta Dhagaysiga ee Dadka Danaynaya (JDF 806).
- ❑ Boosta ugu dir nuqulada **dhamaan** waraaqaha lagu xareeyay Maxkamada (oo ay ka mid tahay Dacwadda Koriyenimada) **iyo** Wargelinta Dhagaysiga ee Dadka Danaynaya (JDF 806) ee la buuxiyay, ugu yaraan 14 maalmood kahor wakhtiga uu bilaabmayo dhagaysigu.
- ❑ Buuxi qaybta Caddaynta Gaarsiinta ee foomka, adigoo ku qoraya magacyada iyo cinwaanada dhamaan dadka aad u dirtay wargelinta iyo taariikhda aad u dirtay oo ku xaree foomka Maxkamada marka la gaadho ama kahor dhagaysigaaga.
- ❑ Hadii cinwaanka qofka danaynaya aan la garanaynin, waa **inaad** ku baahisaa wargelinta dhagaysiga jaraa'idka. Eeg tilmaamaha Ku Baahinta Jaraa'idka ee hoose.

### ❑ Ku Gaadhsiinta Jaraa'idka.

**Hadii aanad wakhti xaadirkan haynin cinwaanka qofka danaynaya, ama hadii aqoonsigiisa aan la garanaynin** oo aanad xaqiijin karin adigoo dadaal macquul ah sameeyey, waa inaad ku baahisaa dhagaysiga jaraa'idka. Kahor inta aanad sidaa samaynin waxaa wanaagsan inaad ka baadho Internetka, la xiriirto cidda hore uu ugu shaqayn jiray, asxaabtiisa, iwm. si aad u hesho cinwaanka qofka ee wakhtigan.

- ❑ **Wargelinta Dhagaysiga ku Baahinta Jaraa'idka (JDF 716).**
  - ❑ Buuxi foomkan oo waa in lagu baahiyo jaraa'idka sida caadiga ah looga akhriska degmada dhagaysiga lagu qabanayo.
  - ❑ Wargelinta waa in la baahiyaa todobaadkii hal mar mudo sadex todobaad ah oo xidhiidh ah, oo taariikhda ugu danbaysa ee la baahinayaa waa inay noqoto ugu yaraan 14 maalmood kahor taariikhda dhagaysiga.
- ❑ Codsi-gudbiyaha waa inuu jaraa'idka ka dalbadaa dhaarta baahinta kadib marka baahinta la dhamaystiro. Dhaartan ku baahinta jaraa'idka, oo uu jaraa'idku diyaariyo, waxay noqonaysaa cadaynta in Wargelinta Baahinta Dhagaysiga (JDF 716) la baahiyay. Dhaarta baahinta jaraa'idka waa inay la socotaa Qoraalka Dhaarta Ku Saabsan ku Dadaalidda iyo Cadaynta Baahinta (JDF 714). Eeg foomka hoos lagu sheegey.

- ❑ **Dhaarta Ku Saabsan ku Dadaalidda iyo Cadaynta Baahinta (JDF 714).**
  - ❑ Buuxi dhamaan qaybaha foomkan. Ujeedada foomkan waxaa weeye in loogu sharaxo Maxkamada dadaalkaaga lagu heleyo shakhsiyaadka ku qoran Wargelinta Dhagaysiga ee Baahinta Jaraa'idka (JDF 716).
  - ❑ Codsi-gudbiyaha waa inuu saxeexaa foomkan.

## Talaabada 4: Dhagaysiga.

Codsi-gudbiyuhu waa inuu yimaadaa dhagaysiga oo waa inuu diyaar u noqdaa inuu keeno cadaymo sheegaya sababta Koriyenimada ay dan ugu jirto ilmaha.

- ❑ Diyaar u noqo inaad keento cadaymo muujinaya in waalidku ay la socdaan dacwadda oo ay ogolaadeen Koriyenimada. Hadii Codsi-gudbiyuhu aanu cadayn karin ogolaanshaha waalidka ee Koriyenimada markaa isaga/iyadu waa inay u diyaar noqotaa keenista cadaymaha muujinaya in waalidku ayna doonaynin ama ayna awoodin inay daryeelaan ilmahooda ama in xuquuqda waalidnimo meesha laga saaray.

- ❑ Hadii Maxkamadu ay u magacawdo Koriye, Maxkamadu waxay soo saari doontaa Warqado (JDF 830) ah oo ah wargelin rasmi ah oo magacaabida ah oo waxay ku siin doonaa nuqul Amarka Magacaabista Koriyaha ah.
  Waxa aad u baahan kartaa nuqulo la xaqiijiyay oo Warqadaha iyo Amarka ah. Lambarka loo baahan yahay wuu kala duwan yahay, waxayna ku xidhan tahay xaaladaada.
  Nuqulada Amarka waa in la siiyaa dhamaan dadka danaynaya ee lagu sheegey Amarka.

## Talaabada 5: Shuruudaha kadib marka Maxkamadu ay Magacawdo Koriyaha.

- ❑ Buuxi, saxeex, ku xaree Qiraalka Masuuliyada (JDF 800) maxkamada. Warqadaha Magacaabista lama soo saari doono ilaa foomkan la xareeyo.
- ❑ Buuxi, saxeex, oo ku xaree Xaashida Macluumaadka Kiiska Dardaaranka (JDF 705) maxkamada, hadii aanad hore ugu xaraynin. Warqadaha Magacaabista lama soo saari doono ilaa foomkan la xareeyo.
- ❑ Tixraac Amarka Magacaabista Koriyaha ee Ilmaha Yar si aad u ogaato hadii/goorta warbixinta sanadku ay ku eeg tahay. Ujeedada warbixinta sanadkii waxaa weeye in la gaadhsiiyo Maxkamada iyo dadka danaynaya badqabka Ilmaha Yar. Warbixinta Koriyaha waa in la siiyaa dadka ku qoran Amarka Magacaabista. Koriyaha waa inuu bixiyaa wargelinta xaraynta warbixinta koriyaha, oo uu la socdo nuqulka warbixinta kuwa ku qoran Amarka Magacaabista toban maalmood gudahood marka uu ku xareeyay warbixinta maxkamada.
- ❑ Tixraac Amarka Magacaabista Koriyaha ee Ilmaha Yar wixii ku saabsan buuxinta Wargelinta Magacaabista Koriyaha iyo/ama Ilaaliyaha (JDF 812). Ujeedada foomkan waxaa weeye in la wargeliyo Ilmaha Yar, hadii uu yahay 12 jir ama uu ka wayn yahay, iyo dadka ee lagu wargelinayo Dacwadda inay xaq u leeyihiin inay dalbadaan in meesha laga saaro ama wax laga bedelo Koriyenimada.
- ❑ Ilmaha Yar uma guuri karo meel ka baxsan Gobolka Colorado iyada oo aan Amar laga haysan Maxkamada.

**Fiiro gaar ah:**
Buuga Koriyaha waxaa loo bixiyaa si uu u caawiyo Koriyaha cusub ee la magacaabay. Buugan waxa uu sheegaa masuuliyada guud iyo arrimaha muhiimka ah ee Koriyenimada, oo uu barbar socdo foomamka muunada ee la buuxiyay si uu gacan uga gaysto diyaarinta.

**Masuuliyadaha koriyaha waxay dhammaan marka uu dhinto, cid kale lagu qoro, ama laga qaado koriyaha ama marka Ilmaha Yar uu dhinto, cid korsata la helo, uu guursado ama uu waynaado. Is casilaada koriyuhu meesha kama saarto koriyenimada ilaa inta ay Maxkamadu ogolaanayso.**